




ENKÖPINGS
KOMMUN



Sidii aad saamayn ugu yeelato mustaqbalka dalka Iswiidan iyo gaar ahaan Enköping ka qaybgal doorashada!

Ka qaybgal doorashada 2026

Markii taariikhda ay ku beegan tahay 13 setembar waxaa la qaban doonaa doorashada baarlamaanka, gobollada iyo xildhibaanada golaha degmooyinka. Laga bilaabo markii taariikhda ay ku beegan tahay 26 agoosto waxaad awoodaa inaad codayso.

Sidatan ayaa ku ogaan kartaa inaad codayn karto

Qof kasta oo xaq ugu leh in u ka qaybgalo doorashada baarlamaanka, gobollada iyo xildhibaanada golaha degmooyinka waxaa loo soo diri doonaa kaarka codaynta.

Kaarka codaynta waxaa lagugu soo hagaajin doonaa sanduuqa farsamada digitalka ama kan boostada caadiga ah.

Kaarka codaynta waxaa ku qoran nooca doorashada ee aad ka qaybgeli karto iyo goobta maalinta doorashada ee aad ka codayn karto.

La kaalay kaarka aqoonsiga

Codbixinta darteed waa inaad aqoonsigaaga caddaysaa. Taasoo tusaale ahaan aad ku caddayn karto kaarka aqoonsiga, kaarka shatiga baabuur-wadista, baasaboora ama qof aqoonsigaaga caddayn karo.

Codaynta waa laga caawini karaa

Qof wakiil ku ah ayaa kuu caawini karo haddii goobta codaynta aadan tegi karin. Waxaad

kaloo ku codayn kartaa adigoo isticmaala sarkaalka

doorashada kaasoo gurigaaga kugu soo booqan doono. Haddii aad caawinaadda noocaas u baahan tahay la xiriir Xarunta xiriiryada [kontaktcenter] ee Dowladda hoose ee Enköping. Xaaladdaas waa inaad maamulka la xiriirto kahor markii taariikhda ay ku beegan tahay 13 setembar saacadda 12.00. Barta internetka waa:


enkoping.se/kontakt

Codeey maalinta doorashada

Goobaha laga codayn karo ee ku yaalaan Enköping waa 24. Haddii aad kuu talo jirto inaad maalinta doorashada codayso, booqo goobta codaynta ee ku qoran kaarka codaynta. Waxaad kaloo ka codeeyn kartaa maktabadda Enköping iyadoo fiirogaar aan la siin halka aad degmada ka degan tahay.

Dhammaan goobaha codaynta waxay maalinta doorashada furan yihin 08-20.

Rog bogga



Maalinta doorashada kahor ayaa laga bilaabo 26 agoosto codayn kartaa

Uma baahnid inaad sugto ilaa maalinta doorashada ee kahor ayaa codayn kartaa.

Goobaha Enköping ee aad ka codayn karto waa:

Maktabadda, Ågatan 29

- Isniin-jimce, saacadaha 10–19
- Sabti-axad ilaa markii taariikhda ay ku began tahay 13 setembar, saacadaha 10–16, iyo axad 13 setembar saacadaha 8–20

Ljunggården, Kraftgatan 14A

- Isniin-jimce, saacadaha 10.00–18.00
- Sabti-axad, saacadaha 10.00–16.00

Fjärdhundra

Brandstationen, Stora vägen 39

- Talaadooyinka, saacadaha 14.30–17.30
- Sabtiyada, saacadaha 10.00–14.30

Örsundsbro

Brandstationen, Enköpingsvägen 51

- Isniin, saacadaha 14.30–17.30
- Khamiista, saacadaha 14.30–17.30
- Sabtiyada, saacadaha 10.00–15.00

Grillby

Tallgårdens omvårdnadsboende, Villbergabyvägen 1

- Talaadooyinka, saacadaha 14.30–17.30
- Sabtiyada, saacadaha 10.00–14.00

Warbixin faahfaahsan

Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan doorashada waxaad ka akhrisan kartaa barta internetka. Isla goobta waxaad warbixinta kuu akhrisan kartaa luqado kale iyo luqadda calaamadaha.

enkoping.se/val

I samverkan med: Wadashaqaynta Hay'adda Doorashada



Valmyndigheten